

Calanka dadka lugula dagaallamayo

culimadu waa ay sheegeen in ay sunno tahay calanka loo qaato jihaadka gaalada lugula jiro, laakiin inti aan baarbaaray weli iima soo bixin iyagoo leh: midab hebel ayaa sunno ah, xukun aan lagaaga horreyinna waa khatar, in magaaloooyinka muslinku deggan yahay calan la suro, midabka uu doono ha yeeshee iyadana ma arag culimadi axaadiithta sharaxday mid ka mid ah oo waa sunno yiri, haddaba kuwa yiri calankeenna qofki diida sunnadi ayuu ka hor yimid, dagaal ayaana noo dhexeeya, waxaa iiga muuqata arrin aan fiicnayn oo khawaarijta laga sheegi jiray, ahna wax bannaan in ay xaaraan ka dhigaan, wax aan sunna ahayna sunna ka dhigaan, wax wanaag ah xumaan laga dhigo, wax xunna wanaag laga dhigo, intabana xiriirin iyo goyn laga dhaliyo, gaaleysiin iyo qoor goynna lugu bannaysto. Kii khawaarij u horreeyay wuxuu eex ku sheegay qaybinti Rasuulka (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye), kuwii Cali uu la dagaallamayna waxay gaalnimo ka dhigeen wax bannaan oo ah in muslinki dirirsanaa la kala dhexgalo oo rag loo bixiyo kala xukuma. Ragga waqtigan jooga Soomaaliya haddii ay calan dad kula diriraan waxay noqonaysaa laba middood:

- 1- Calanka buluugga ah ee astaanta u ah dowladda soomaaliya tan iyo intii ay gumeysigi Talyaaniga iyo Ingiriiska ka xorowday, xukunkiisuna yahay in uu bannaan yahay haddii aan xumaan loola jeedin, ama aan wax lugu dulmineyn, caqiidda xunna laga aaminsanayn. Qofki yiraahda calankaa haddaadan dhigina dhiiggiinnu waa ii xalaal, ha la ogaado wax bannaan ayuu dhiig muslim ku bannaystay.
- 2- Calanka ay shabaabku wataan ee towxiidku ku qoran yahay, ama ha madoobaado ama ha caddaadee, in la yiraahdo qofki aan aqbalin dhiiggiisu waa uu noo bannaan yahay. Arrintaasina arrin sharciga waafaqsan ma ahan, sababaha soo socda awgood:
 - a- Calan waxaa la qaataa marka jihaad gaalo loo baxaayo, soomaalidu ma gaalaa?.
 - b- Calanka waxaa dhiiba Madaxweynaha, isagaana qaabilsan agaasimidda dagaalka iyo nabadda. Rasuulku (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) isagaa calammada dhiibi jiray, qofkii rabaa iskama qaadan jirin. Dagaalki Kheybar waa kii yiri: berri calanka waxaan u dhiibayaa nin Alla

iyo Rasuul jecel yihiin ama wuxuu yiri: Alla iyo Rasuul jecel, markaas ayaa nin waliba u hanqal taagay, Cumar waa kii yiri maalinkaas kaliya ayaan madaxtinnimo jeclaystay, sababtana waa la fahmi karaa oo waa fadliga loo sheegay ninka calanka loo dhiibayo, ee si ahaanteeda uma jeclaan madaxtinnimada, sharcigana kuma fiicna in la jeclaado madaxtinnimada. Ka dib Rasuulku (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) wuxuu u dhiibay Calankii Cali ibn abii daalib. Culimaduna way sheegeen in calanka arrintiisu tahay arrin hoggaamin iyo madaxtooyo xiriir la leh, oo madaxda looga danbeynayo. Xadiithki Bukhaari weriyay (lr.2976) waxaa ku jiray in Cabbaas ibni cabdilmuddalib uu ku yiri Zubeyr ibnil cawaam: ma halkan buu ku amray Rasuulku in aad ka taagto calanka. Waxayna ahayd maalintii la furanaayay Makka.

- c- Rasuulku (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) wuxuu yiri: waxaa la I faray in aan dadki la dagaallamo inta ay laa'ilaaha illallaahu ka dhahayaan, salaaddana ka tukanayaan, zakadana ka bixinayaan. Ma dhihin inta ay calan hebel ka oggolaanayaan. Haddii aad tiraahdo towxiidka ku qoran ayaan kala jeednaa. Jawaabtu waxay tahay, towxiidka in lugu hadlo ayuu qofku ku islaamaa, ee kuma islaamo in uu calan ku qorto. Iyadoo asal ahaanba xaafid ibnixajar alcasqalaani ka yiri xadiithka sheegay inuu ku qornaa calanki Rasuulka (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) towxiidku: waxaa lugu weriyay sanad aad u taag daran. Ka fiiri fatxul baariga 6/127.
- d- Horana waxaan u soo sheegay in marka magaala muslin la deggan yahay qofki yiraahda calan taagiddu waa sunno looga baahan yahay daliil cad oo sheegaya arrintaa iyo fasiraaddii culimada. Haddii aan daliil la keeninna qofki waa sunno yiraahda bidco ayuu ku dhacay.